

— 798 —

BAABKA SHANAAD

AWOODAHA GARSOORAH

Qodobka 77aad

Is waafijinta waxa la weydiinayo iyo waxa lagu dhawaaqayo

Garsooruhu waa inuu ka jawaabaa dalabaadka dacwadda oo dhan, mana aha inuu xuduuddeeda dhaafo. Hase yeeshii waxaa u bannaan inuu go'aan ka gaadho arrimo ayna dhinacyadu soo jeedin, haddii danta guud sidaa keento.

Qodobka 78aad

Xukun raacsan qaynuunka iyo cadaaladda guud

Markuu ku dhawaaqayo xukunka, Garsooruhu waa inuu raacaa sharciyada Dawladda. Haddii uu waayo qodob sharci ah oo u dabbao waa inuu raacaa mabaadii'da sharciga Islaamka, haddii kuwaasna ui waayo waa inuu raacaa mabaadi'da caaddaaladda ijtimaaciga ama cadaaladda guud.

Qodobka 79aad

La soo bixidda sugidda

Garsooraha waa inuu go'aanka sal uga dhigaa caddeyn ta ay soo Bandhiggaan dhinacyada. Hadhiise ay noqoto lagama maarmaan, waa u bannaan tahay inuu raadiyo caddeyn kasta oo waxtar u leh soo saariddha go'aanka.

Qodobka 80aad

Qiimeyn ta sugidda

Haddii uuna sharcigu sheegin si kale Garsooraha waxaa waajib ku ah inuu u qiimeeyo sugidda si taxaddar ku jiro. Waxaa u bannaan inuu sugidda ka, oo baxo weydiinta suran ee loo jeediye dhinacyada, basrista qofka ama alaabta ama wax allaale wixii ah xaqijjin.

Qodeebka 81aad

Faafinta xukunka

Haddii faafinta xukunka ay waxtar u leedahay kabicda dhibka.

Garsocraha waxaa u bannaan in uu amro in xukunka lagu faafiyo wargeysyada ama sidii kale ee wax loo faafiyo.

— 799 —

BAABKA LIXAAD

MADAXA KOOWAAD

TILLAABOOYINKA DACWADDA

QAYBTA KOOWAAD

QAABKA TILLAABOOYINKA

Qodobka 82aad

Ku xiritaan la'aanta qaabka

Haddii sharciga si kale uusan sheegin, tillaabooyinka dacwadda waa loo sameyn karaa qaabka ku habboon ee lagu gaari karo danta laga leeyahay.

Qodobka 83aad

Isticmaalka afka Soomaaliga

Afka lagu isticmaalayo tillaabooyinka dacwadda oo dhan waa af Soomaaliga, Garsooraha waxaa u bannaan inuu magacaabo turjubaan mararka loo baahdo.

Qodobka 84aad

Weydiinta loo jeedinayo dhagocodka ama hadallaawaha

Haduu ay waajib tahay in la dhegeysto qof dhagala hadallaawa ah ama labadaba ah waxaa bannaan in weydiinta iyo jawaabaheeda lagu sameeyo qoraal ama uu ka turjubaano qof awood u leh af garashada dadka noccaas ah.

Qodobka 85aad

Waxyaabaha laga helo tallaabooyinka dacwadda iyo saxiixa dhinacyada

Waxaa waajib ah in laga helo warqadaha dacwad furicda tilmaanta Maxkamadca ay u jeedaan, dhinacyada, mawduuca dacwadda, asbaabteeda iyo dalabaatka kama dambeysta ah.

Waxaana waajib ah inuu saxiixo dhinaca ama qareenka wakiilka ah.

CIVIL PROCEDURE CODE 1974 (Somali)

www.somalilandlaw.com

— 800 —

Qodebka 86aad

Qoraalka Dacwadda

Waxyaabaha loo baahan yahay in laga helo qoraalka dacwadda waa in lagu tilmaamaa dadka ka soo qayb galay, meesha iyo waqtiga lagu sameeyey warqadaha iyo dhammaan tillaabooyinka la qaaday.

Qoraalka dacwadda waa inay wada saxiixaan Kaaliyaha iyo Garsooraha, haddii kale wuxuu noqonayaa wax kama jiraan.

QAYBTA LABAAD

FADHIGA

Qodebka 87aad

Maamulka qaadidda dacwadda

Dacwadda qaadiddeeda waxaa maamulaya Garsooraha Madaxa ka ah Hay'adda garsooridda kaasoo mas'uul ka ah habsamida fadhiga iyo nidaamkiisa.

Qodobka 88aad

Fdhiga furan

Fadhigu waa inuu furnaadaa haddii kale waa waxba kama jiraan, hase yeeshi waxaa Garsooraha u bannaan inuu amro in fadhigu ahaado qarsoodi, haddii ay jiraan asbaabo xagga nabadjelyada, nidaamka guud ama anshax-wanaagga.

Qodobka 89aad

Waajibaadka qofka ka qayb gaaya ama chegeysanaya fadhiga

Qofka ka qayb galaya fadhiga waa inuu dhawraa aadaabta wanaagsan, mana haysan karo hub ama ul.

Qodobka 90aad

Diyarinta qoraalka dacwadda

Fadhi kasta waa in loo sameeyaa qoraal dacwadeed.

QAYBTA SADDEXAAD

XUKUNKA

Qodobka 91aad

Qaabka tillaabooyinka guud aliaan.

Haddii sharcigu si kale uusan amrin, tillaabooyinka garsooraha waxy lahaan karaan qaab alla qaabkii ku habboon ee lagu gaari karo danta laga leeyahay.